# INQILLAABKII 1961 IYO ISDACWADEYNTII

## SIDCIYO MAXAMED IYO CAWRALA MUUSE MATAAN

Luulyo 2020

Bahda Mareegaha Farshaxan

*"Qoraalkani wuxuu ka mid yahay qoraalo dhawr ah oo lagu soo bandhigayo maalintii mugdiga iyo meehanawga laheyd ee 1da Luulyo, 1960".*




Dhawaaq dhiilo ah ayaa soo gaadhey madaxdii Jamhuuriyadii Soomaaliya ee ka unkatey labadii dal ee ujeedo fog iskugu darsamey. Labadaa dal waxay kala ahaayeen Somaliland iyo Somaliya. Midawgaa ujeedada fog lahaa wuxuu dhacey bishii Luulyo 1dii ee gu'gii 1960kii. Hase yeeshee maalmo ka dib waxaa dhacey isdiidmo aan lala gaban oo ka dhex dhalatey labadaa dal. Isdiidmadaasi waxay ku salaysnayd dareen Soomaalinimo oo aan jirin, sad quudhsi iyo xil qaybsigii dawladaa la iskugu yimid si loo suurtogeliyo in la helo shantii Soomaaliyeed. Hase yeeshee ididiiladii la qabey ayaa maalmo ka dib qaadey wadadii burburka iyo kala guurka.

Si loo sugo loona hirgeliyo kala guurka ayaa waxay reer Soomaaliland codkoogii ku sheegeen aftidii loo qaadey Dastuurkii la meel mariyey bishii Juun 20dii ee gu'gii 1961kii. Hase yeeshee maamulkii ku meel gaadhka ahaa ee madaxweyne Aadan Cabdiluh (Aadan Cadde) iyo Ra'iisal Wasaarihii Cabdirashiid Cali Sharmaarke waxay dhawaaqaa ku soo dhaweeyen dhego laydh u daloola. Dhib ay labaduba dareensanaayeen ayaa billo ka dib fal ahaan lagu muujiyey bishii Diisember 10, 1961.

Aftidaasi waxay muujisey in qaybsanaan iyo kala fogaansho ay ka jirto labadii dal ee isku darsamey oo ay Somaliland bilawday gadood siyaabo kala duwan loo soo bandhigey, sidoo kale ayaa dhinaca Soomaaliyana (Italian Somalia) ay soo banbaxeysay ishirdigii ka dhexeeyey labadii reer ee Hawiye iyo Majeerteen.

Kala fogaanshahaa iyo calool xumaantaa iyadoo lagu jiro ayaa la guddo galey doorashadii madaxweynaha ee bishii Luulyo 6dii ee gu'gii 1961kii. Doorashadaa madaxweynaha waxaa ku loolamayey Aadan Cabdule Cismaan iyo Sheekh Cali Jimcaale Baraale. Labadan tartame waxaa kala taageerayey labadii loolane ee ka jiri jirey dalkii Soomaaliya (Italian Somalia) oo kala ahaa

Majeerteen iyo Hawiye siday u kal horeeyaan. Inkastoo ay labada tartame degaan ahaan ka soo wada jeedeen magaalada Beledweyn ee gobolka Hiiraan, waxaase kala raacsan labada loolane.

Dadkii aan labadaa loolane aheyna labadaa ayey kala raaceen sida badanka xildhibaanadii reer Soomaaliland oo aad ugu xaglinayey inuu soo baxo Sheekh Cali Jimcaale Baraale oo ay samaysteen isgaashaan buureysi. Inkastoo koox yar oo ka mid aheyd xildhibaanada Soomaaliland ay u sacab tumayeen Aadan Cabdule Cismaan.

Codbixinta markii saddexaad waxaa ku guuleystay Aadan Cabdule Cismaan. Waxaa la waayey codkii Hawiye ee uu isku haleynayey Sheekh Cali Jimcaale. Halkaa markey arini mareyso ayaa Axmed Keyse Xaaji Ducaale oo ka mid ahaa garabkii iyo gaashaankii reer Soomaaliland ee Sheekh Cali Jimcaale laga hayaa inuu reebay maalintaa weedha ah:"Ragga maanta geesigoodii halkaa dhigey naf ma leh". Waxaanu raaciyey Axmed Keyse Xaaji Ducaale maahmaah AF Carbeed ah oo Af Soomaali ahaan ku dhawaaneysa odhaahda ah: "Saaxiibka nacaska ah waxaa dhaama cadawga caqliga leh".

Waxa guushaasi ay ku raacdey Aadan Cabdule Cismaan hal cod dheeri. Waxaa Sh. Cali Jimcaale ka leexday oo codkaa aan siin oo lacag qaatey xildhibaan Cabdilaahi Maajuur. Lacagta uu qaatey waxay aheyd 10,000 shillin (Toban Kun oo shilin). Waxaa gacanta ka saarey Cabdirisaaq Xaaji Xuseen. Waxaa weli ku jira maanka dadkii dhacdadaa u joogey in lacagtaa badhtanka laba loogu kala jeexay loona dhiibey jeex, looguna ballan qaadey in jeexa kale la siin doono marka uu codkiisa siiyo Aadan Cade. Markii uu codkii bixiyey Cabdilaahi Maajuur ayaa la siiyey jeexii kale oo intuu isku xabageeyey geeyey Baanka sidii qorshuhu ahaa, looguna soo badaley mid cusub. Waxay dhacdadani ku noqotey Cabdilaahi Maajuur qoorgoyn siyaasadeed (political assassination), dib danbena looma soo dooran. Wuxuu Cabdilaahi Maajuur ka soo jeedaa degaanka Belledweyn ee gobolka Hiiraan. Taariikh xumana u gashey isaga iyo tolkiiba sooyaalka siyaasadeed, isaga iyo tolkiina kala irdhoobe.

Tijaabadani waxay noqotey hab dhaqameed shaxda siyaasada looga sargooyo. Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaal ayaa gu'gii 1967kii isagoo ka duulaya dhacdadaa ku biirey xisbiga SYL, kana digorogtey xisbigii SNC ee ay Sh Cali Jimcaale ku wada jireen,kol haddaanu taageero ka keenayn Hawiye.

Madaxweyne Aadan Cabdule Cismaan wuxuu u magacaabey ra'iisal wasaare Cabdirashiid Cali Sharmaarke. Magacaabistaasi iyo guushaasi waxay sii fogeysay niyadii ay reer Soomaaliland u

qabeen raadinta shanta Soomaaliyeed, waxaaney bilaabeen in la sii wado kala gurashadii loo hawlgaley maalmo ka dib bishii Luulyo 1dii ee gu'gii 1960kii. Sidaa darteed ayaa gu'ga 1991kii reer Soomaaliya waxay u yaqanaan gu'gii burburka, halka ay reer Soomaaliland-na u yaqaanaan gu'gii guusha loo hawlgaley xilligaasi ay ku rumowdey shirkii Burco ee ku dhamaadey maamuuska maalinta May 18, 1991. Laba kala fog!

Bishii Diisember 10dii, ee isla gu'gaa 1961kii ayaa samaan wax ku raadintii loo badaley halgan hubeysan oo ay hogaaminayeen saraakiishii reer Soomaaliland. Saraakiishaasi waxay u hawlgaleen inay gacanta ku dhigaan dhulkii Soomaaliland oo ay soo guryo-celiyaan Maandeeq.

Markii hawlgakaasi dhacey ayaa dhawaaq dhiilo lihi soo gaadhey maamulkii Jamhuuriyadii Soomaaliya ee uu hogaanka u hayey Aadan Cabdule Cismaan.

Haween dhawr ah ayaa ku jirey ururkii SYL ee ka dhisnaa Soomaaliya (Italain Soomaaliya), inkastoo markii danbe iskudarka la iskugu wada biyo shubtey ururkaa. Haweenkaa dhinaca Soomaaliya waxaa aad u firfircoonaa ilma Mataan. Halka dhinaca reer Soomaaliland ay gebi ahaanba ku jireen shan haween ahi oo kala ahaa Maryan Ibraahin oo u dhaxdey Cali Xaadhxaadhato (Hawiye-Sacad), Sidciyo Maxamed oo u dhaxdey Macalin Jaamac (Dhulbahante), Qarad Cigaal , Qamar Cabdule Walanwal, iyo Kudhuun Ducaale.

Cawrala Muuse Mataan oo ka mid aheyd hormoodkii dumarka ee SYL dhinacna isku xaglineysay dawlada ayaa u aragtey in halgankaa Milataeri lagaga soo horjeedo dawladooda. Sidaa darteed ayey qoraal canbaareyn iyo waxa laga yeelayo raga ka danbeeyey Inqilaabkaa ku soo xaradhey wargeyskii SYL. Waxayna Cawralii soo jeedisay in dhamaan la soo xidhxidho kuwa hawlgalkaa fulinayey iyo kuwa taageersanaaba.

Qoraalkaa ayaa ku soo baxey wargeyskii SYL. Waxaa dadkii la yaab ku noqotey dhiiranaanta intaa leeg ee ay la timid Cawrala Muuse Mataan iyo dawlada ay is xigsiisey. Cawrala waxay ilmaadeer yihiin xaaska madaxweyne Aadan Cabdule Cismaan ee aheyd ina Cilmi Mataan, sidoo kale ayey eddo u aheyd taliyihii bileyska ee Maxamed Abshir Muuse Mataan, waxay sidoo kale aad isugu dhawaayeen ra'iisal wasaare Cabdirashiid Cali Sharmaarke iyo wasiirkii arimaha gudaha ee Cabdirisaaq Xaaji Xussen. Xaalku wuxuu noqdey gardaro garab og miyaa! Waxaa sidaasoo kale yeelay Maxamuud Cabdilaahi Singub markey dadkii wax barey dareenkooga ku muujiyeen Silsiladii Deelley, waxaanu yidhi:

Maansadeydu waa Danab

Caku! Dawladdaydaay

Dadkeedaba ma garatooy

Maxamuud Cabdilaahi Singub kamuu mid aheyn labadii dal ee iskugu darsamey magaca Jamhuuriyadii Soomaaliya, hase yeeshee wuxuu qaxooti ahaan ku yimid Jamhuuriyadii Soomaaliya ka dib dagaalkii 1964, soo dhaweyn walaaltinimo ayaana loo fidiyey. Dawlad Degaanka Soomaalida ee Itoobiya oo uu ka soo qaxeyna waxaa laga qaxey ilaa afar jeer (1937, 1955, 1964, iyo 1978). Inta jeerba waxaa gacmo furan iyo si deeqsinimo leh u soo dhaweeyey dadka reer Soomaaliland.

Sidciyo Maxamed oo dhalasho ahaan ka soo jeeday dalkii Soomaaliland waxay ka mid aheyd dadkii aad ula yaabey dhiiranaanta Cawrala iyo fariinta uu qoraalkeegu gudbinayo. Sidaa darteed ayey Sidciyo go'aansatey inay ku soo oogto dacwad. Sidciyo waxay aad u diidaneyd in wargeyska xisbiga lagu wado jiro uu u hogaansamo aragtida qofeed ee Cawrala. Waxaaney Sidciyo ogoleyd inuu noqdo wargeys gudbinaya aragtida guud ee xisbiga SYL.Sidciyo Maxamed waxay ka soo jeeday dalkii Soomaaliland, waxaaney u dhaxdey Cali Jimcaale oo isna ka soo jeeday Soomaaliland, aadna loogu xasuusto inuu waxbarista Cabdirashiid Cali Sharmaarke iyo Cabdirisaaq Xaaji Xuseen kaalin laxaad leh ka qaatey, lana yidhaa isagaaba u bilaabey waxbarashada bilawgeedii.  Halgankiisaa waxbarasho si loo muujiyana waxaa loogu magac darey dugsi ku yaala magaalada Muuqdisho.

Waxaa markiiba taageero laxaad leh Sidciyo Maxamed la soo garab istaagey dumarkii Hawiye ee ku jirey xisbiga SYL ayna hogaanka ka mid aheyd Dhuubo oo u dhaxdey Sh. Cali Jimcaale. Haweenka Hawiye oo taageerana ka haystay tiro badan oo siyaasiyiinta Hawiye ah ayaa balanqaadey inay u qabanayaan garyaqaan Maxamed Sh. Axmed Gabyow oo markaa ahaa garyaaqanada la tilmaansado ee markaa loo tirinayey inuu lahaa aqoonta xeerka, kana soo jeeday Hawiye.

Waxaase arintaa aad uga soo horjeeday dad fara badan una arkayey in taageeradaasi ay ku danbeyn doonto shimbir garab la'. Waxaana markaa aad u sii cusbeyd dhacdadii doorashada lagaga helay Sh. Cali Jimcaale. Waxaa u yimid Marwo Sidciyo Maxamed laba haween ah oo itaalkooda isku dayey inay uga digaan askhateynta Cawrala Muuse Mataan.  Labada haween waxay kala ahaayeen Qamar Cabdiqaadir oo u dhaxdey Axmed Keyse Xaaji Ducaale iyo Faadumo Xasan. Hase yeeshee arintaa may soo dhaweyn Sidciyo Maxamed, waaney fulisey gudbinta dacwada.

Waxaa la guddo galey u diyaargarawga hortegista maxkamada u kala garnaqeysa dacwad gudbiyaha Sidciyo Maxamed iyo eedaysane Cawrala Muuse Mataan.

Maalmo ka dib ayaa waxa la keenay magaalada Muuqdisho saraakhiishii fulineysay Inqilaabka oo lagu xidhay Jeelka. Waxaa haystay jeelka Ismaaciil Axmed Ismaaciil, halka uu sarkaal hoosena ka ahaa Xasan Cabdi Kheyre. Labaduba waxay ka soo jeedaan degaan ahaan Soomaaliland, laakiin aragti ahaan way kala duwanaayeen. Ismaaciil waxaa aad ugu muuqatey gudashada xilkiisa, halka ay Xasan saameyn ku laheyd dareenkiisa sababta Inqilaabka loo samaynayey.

Sidaa darteed ayuu Xasan Cabdi Kheyre ka soo warami jirey kana keeni jirey saraakiisha fariinta ku aadan baahiyahooda, sidoo kalena uu kaalin weyn ka geystay noqoshada xidhiidhiyaha saraakiisha iyo xubnaha Xamar joogey ee isku abaabuley kaalmeynta saraakiisha. Si kale marka loo eego Ismaaciil Axmed Ismaaciil waxaa hore ugu dhaxdey gabadh la dhalatey Xasan Cabdi Kheyre, inkastoo aanay markaa wada joogin. Dareen iyo damqasho ayaa labadaa sarkaal kala hogaaminayey, ilaa iminkana dareenkii xilligaa hagayey ayuu Ismaaciil Axmed Ismaaciil la joogaa magaalada Muuqdisho!

Waxaa Ismaaciil Axmed Ismaaciil aad u dhibey weedho ay ku tidhi Qamar Cabdulle Walanwal. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa sidii caadada u aheyd iyadoo Qamar u sii lugeynaysa Jeelka ay aragtey gaadhigii Ismaaciil Axmed Ismaaciil. Qamar waxay iyadoo socota jidkaa kulaylka iyo boodhka badan oo waliba wada cuntadii ay horjoogsatey gaadhiga uu ku dhaafi jirey Ismaaciil Axmed Ismaaciil waxaaney ku tidhi: “Ismaaciiloow sabankii xumaadaa dadka kala saafa ee kuwaad u shaqeyso u sheeg inaanad naga dhalan ee uu ku dhalay Ina Garbo Cune”. Weedhaasi way dhibtey Ismaaciil, waxaanu uga soo dacwoodey Qamar Cabdiqaadir inay kala hadasho Qamar Cabdule Walanwal, sidoo kale ayuu dacwad sidaas oo kale ah ka keensadey Xasan Cabdi Kheyre oo aanu jeclaysan xidhiidhka uu la leeyahay saraakiisha inqilaabka sameeyey ee xidhan.

Dadkii magaalada Muuqdisho joogey ee ka soo jeeday Soomaaliland ayaa is abaabuley. Haweenkii markaa joogay waxay xil qaadeen inay cuntada karinayaan, ayna u gaynayaan. Girgirayaasha dhawr waxaa laga soo qaadey guriga Maryan Xuseen oo u dhaxdey Cali Garaad Jaamac, cuntadana waxaa la isla gartey in lagu kariyo guriga Sidciyo Maxamed oo u dhaxdey Macalin Jaamac oo haweenku iskugu iman jireen si ay u wada kariyaan, halka loo igamdey in ay cuntada geyso Qamar Cabdule Walanwal. Hawsha badankeedu waxay ku dhacdey haweenkii ka soo jeeday Soomaaliland ee joogay magaaladaa Muuqdisho.

Sidoo kale waxaa dhinacaa Hargeysa ka timid Siraad Xaaji Aadan Yuusuf Qabile oo kaalin fiican ka qaadatey inay xidhiidh la samayso Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaal oo markaa ahaa wasiirka gaashaandhiga.

Waxaa sidoo kale ka yimid Burco xeer yaqaan Cabdilaahi Axmed Weyd oo kaalin fiican ka soo qaatey ururintii lacagtii lagu qabtey garyaqaanadii u doodayey saraakiisha oo laga keenay Cadan, sidoo kalena ka hawlgeli jirey Kiiniya, una dhashay dalka Hindiya. Lacagta la ururiyey waxaa lagu qiyaasey ilaa 41,000 shilin (Kow iyo afartan shilin Soomaali ah) oo xilligaa lacag badan aheyd.

Cabdilaahi Wuxuu wax ku soo bartey dalkaa Kiiniya siiba qorista waraaqaha/arjiyada dacwadaha Maxkamadaha. Inaadeerki ayaa u shaqeyn jirey gabadh u dhalatey dalka Denmark oo aad wax uga qori jirtey Soomaalida, deganeydna Kiiniya. Sidaas ayey Cabdilaahi ugu suurtogashey inuu waxbarashadiisa ku qaato Kiiniya oo uu joogi jirey gurigeeda, waxaaney kaalin fiican ka qaadatey soo iibsiga Teebka (Typewriter) uu adeegsan jirey.

Sidoo kale ayaa Maamulkii Ingiriis ee ka jirey Soomaaliland magacaabey laba xubnood oo noqdo Civil Service Board. Labadaasi waxay kala ahaayeen Cabdilaahi Axmed Weyd iyo Jirde Xuseen. Markii danbena waxaa loo magacaabey Cabdilaahi Axmed Weyd inuu ka mid noqdo Qaadi hoosaadka (Subordinate Court Judge). Intaa ka hor Cabdilaahi Axmed Weyd wuxuu kaga shaqeysan jirey magaalada Burco arji qorista (Petition Writer).

Waxaa dhianca  sharciga ay ka wada shaqeyn jireen  Cabdiraxmaan Cali Maxamed(Dube Cali Yare),Ibraahin Aadan(Qalabjaan),Maxamed Jaamac Boodhleh(Guun),Aw Cismaan Yuusuf (Sandheere),Axmed Cabdilaahi Qaalin(Gilin), Cabdulaahi Maxamed(Teeb garaace),Ibraahim Faarax weyl, Cabdiraxmaan Sh. Cali Siciid(Buur Hakabo), iyo Maxamuud Sh. Axmed.

Waxaa la gaadhey maalintii loo suntay in la qaadayo dacwada. Habeenimadii ka horeysay ayey dhawaaq aaney ku farxin soo gaadhey Sidciyo Maxamed.  Waxaa loo sheegay in uu magaalada ka maqan yahay garyaqaan Maxamed Sh.Axmed Gabyow, hase yeeshee la diyaariyey garyaqaan Talyaani ah oo buuxinaya meeshuu baneeyey garyaqaan Maxamed Sh.Axmed. Alloow arinta fududee iyadoo Sidciyo leh ayey ku seexatey habeenkaa.

Aroornimadii ayaa loo wada kalahay dhinacii maxkamada way sii luudey Sidciyo, waxaase sii raacey si ay u taageeraan haweenkii ka soo jeeday Soomaaliland ee ay ka mid ahaayeen Qamar Cabdiqaadir, iyo Qamar Cabdule Walanwalan. Waxay ku kulmeen albaabka maxkamada haweenkii ka socdey beesha Hawiye oo ay ka mid aheyd Dhuubo. Iyagoo iswareysanaya sugayana

garyaqaankii Talyaaniga ahaa ayaa waxaa yimid koox iswadata oo ay ku jirto Cawrala Muuse Mataan. Markii ay Cawralii indhaha ku dhufatey Dhuubo oo ku dhex jirtey dadka taagnaa maxkamada horteeda ayey tidhi: “Dhuubooy ma adigaa reer Woqooyi been u sheegay”.ka dibna hore ayey Cawralii u sii gashey maxkamadii.

Waxaa la guddo galey dacwadii, hase yeeshee ilaa iminka lama hayo garyaqaankii u doodayey Sidciyo Maxamed. Muddo kooban markii la sugayey ayaa waxaa la isla gartey in dacwada la furo. Waxaana isku soo banbaxey garyaqaankii u doodayey Cawrala Muuse Mataan iyo Sidciyo oo aan wadan garyaqaan. Dacwadii ayaa waxay ku soo gabogabowdey in la xukumey in aan eedeynta lagu helin Cawrala, aaneyna jebin xeerka SYL ee ogolaanaya cabirida qof waliba dareenkiisa. Waxaana sidoo kale lagu xukumey Sidciyo Maxamed inay bixiso ganaax lacageed oo daboolaya kharashkii ku baxey guddo galka dacwada iyo garyaqaanka u doodayey Cawrala oo lagu qiyaasey lacag dhan ilaa 3000 shilin.

Markey Sidciyo maqashey gunaanadka dacwada ayey dhulka ku dhacdey. Guriga ay Sidciyo deganeyd oo ku yaaley Ceel-Gaabta oo ahaa guri roon oo deyr weyn leh ayaa la keenay. Qamar Cabdiqaadir oo ka warameysa ayaa tidhi: “Waxaanu jiifiney geed ku yaaley deyrka dhexdiisa, in yar ka dib ayaa waxaa albaabka deyrka soo garaacey Cawrala oo ay la socdaan laba dumar ah oo kale, aad bey ugu dul dhacdey raaligelina bixisey Cawralii iyadoo ku dhawaaqeysay – Marna Sidciyooy dhib inaan kuu geysto ma rabin, ee Hawiye iyo idinkaan iskiin barayey”. Dhacdadani waxay ka mid aheyd dhacdooyinka taariikhda galey, hase yeeshee aan waxba laga baran!

Dacwada labada haween, waxaa dhinac socotey dacwadii lagu oogayey saraakiisha. Aroor uun baa lagu toosay qoraal lagu soo qorey wargeyskii AL-Waxda ee ku soo bixi jirey afka Carabiga. Qoraalkaasi aad buu u gilgilay magaalada Muuqdisho iyo Dalkii Jamhuuriyadii Soomaaliya. Sidoo kale ayaa qoraalkaa loo kala direy madaxweyne Aadan Cabdule Cismaan, Ra’iisal Wasaare Cabdirashiid Cali Sharmaarke iyo Wasiirkii arimaha gudaha oo ahaa Cabdirsaaq Xaaji Xuseen.

Warqadaa waxaa qorey Cabdilaahi Axmed Weyd oo kaashanayey garyaqaanadii Hindida ahaa. Waxay warqadaa iyo waraaqaha dacwada dhamaantood ku jiri jireen shandan (Samsonite) ah oo uu had iyo jeer gacanta ku laadlaadsan jirey Cabdilaahi Axmed Weyd. Aroortii ayuu Cabdilaahi Axmed Weyd ka soo qaadan jirey shandadaa guriga Axmed Keyse Xaaji Ducaale, galabtiina halkaa ayuu ku qarin jirey. “Shandadaa waxaad ku ridaa markuu keeno Cabdilaahi halka aad dahabka ku qariso” ayuu ku odhan jirey Axmed Keyse marwadiisa Qamar Cabdiqaadir.

Cabdilaahi Axmed Weyd waxaa saarnaa hilib dhib ku hayn jirey qaab socodkiisa. Qamar Cabdule walawal oo dhawr jeer aragtey Cabdilaahi, aanse isku xidhiidhin warqada dalkii ganaca goysay iyo Cabdilaahi ayaa loo sheegay inuu isaga yahay ninka wargeyska ku qorey. Qamar Cabdule ayaa laga hayaa inay tidhi ku fal celisay: "Ma odaygan bidhi-baadhaqtamaya ayaa qorey warqada guuxa weyn".

Gadoodka Saraakiisha oo ka dhacey dhinaca Soomaaliland, Xeer maxkamadeed ka wada dhexeeya labada dal ee isku darsamey oon jirin, ayaa keensanayey inay dacwadaasi qaado maxkamada Soomaaliland oo markaa gacanta ugu jirtey dawladii Ingiriiska.Hase yeeshee nabadgelyo ahaan ayaa loo doortey in maxkamada loo soo guuriyo dhinaca Soomaaliya. Soomaaliland waxay ku dhaqantaa xeerka Indian Penal Code, halka ay Soomaaliya ku dhaqanto xeerka Talyaaniga oo ay iyagu ugu yeedheen Somali Penal Code si ay samaysteen. Waa riyo ku nool iyo xaalkeed!

Garsooraha dacwadaa qaadayey wuxuu ahaa Ingiriis laga soo kaxeeyey dhinaca Soomaaliland oo la odhan jirey Hayzal Worth, aaney reer Soomaaliland u yaqaaneen Jini Qoryaale. Wuxuu Jini Qoryaale lahaan jirey faro dhidid, gacmaha ayaanu had iyo jeer ku sidan jirey qoryo. Garsoore Jini Qoryoole aqoon umuu laheyn ku hadalka afka Talyaaniga. Iyo xeerarka Talyaanigaba.Waxaa dacwadaa qoris koobe (Stenographer) ka ahaa Ambassador Maxamed Cismaan Cumar Ibraahimoo. Daljiraha oo geeridiisa ka hor marar aanu wareysaney aad uga xumaadey inuu raadiyey qoris koobistaa oo aanu ku guuleysan helistooda. Waxaa xeer ilaaliya ka ahaa garyaqaan Talyaani ah oo ahaa Severino Saniabichi oo aan aqoon u laheyn xeerka Indian Panel Code asal ahaanba, sidoo kalena aan ku hadlin afka Ingiriisiga. Waxaa garyaqaan u ahaa saraakiisha garyaqaano Hindi ah oo ku hadlaya Afka Ingiriisiga. Markhaatiyadu waxay ahaayeen Soomaali, eedaysanaayshu waxay ahaayeen Soomaali. Waxaa lagaga hadlayey maxkamadaa Afafka Soomaali, Talyaani iyo Ingiriisi oo la isku afcelinayey kolba. Dacwada oo sideedaba u adkeyd ayaa waxaa sii adkeynayaye isku afcelinta saddexda af ee Soomaali, Ingriisi iyo Talyaani sida uu wareysi noogu sheegay Ambassador Maxamed Cismaan Cumar Ibraahimoo.

Waxaa saraakiisha lagu soo eedeeyey inay ku kaceen fal qaran dumis ah sida ku xusan qodobka 121aad ee Indian Penal Code, in kasta oo uu Jeneral Daa'uud doonayey in saraakiisha la horgeeyo maxakmada Milatary si ay suurtogal u noqoto in la mariyo ciqaabta ugu adag, laba dalal oo xeer ahaan iskugu darsamey ayaan jirin oo doonistaa u adeegaya. Qoraal kayd yaraha (personal diary) ee madaxweyne Aadan Cabdule Cismaan waxaa laga hayaa inuu arintaa Jeneraal Daa'uud ku faaleeyey "Waa arin aanu ogolaaneyn dastuurku".

Garsoorihi Jini Qoryooley markuu dacwadii wada dhageystay wuxuu ku soo gunaanadey sidan:

- In aanu jirin sharci ay dalalka Somaliland iyo Somalia ku midoobeen
- In aaney eedeysaneyaashu dembi ka gelin dal la yidhaa Jamhuurida Soomaaliya
- In eedeysaneyaashu aaney muwaadiniina u ahayn dal la yidhaa Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, aaneyna u dhaaran, hase yeeshee ay u dhaarteen Boqorada Ingiriiska.

EEdaysanaayasshii ayaa oodda laga qaadey, kana wada baxey albaababada Maxkamada. Dawladii way wareertay, saraakiisha laftigooda waxaa ku dhacey u qaadan waa, dadkii reer Soomaaliland farxad iyo reyn reyn ayey albaabada boobeen.

Xeer Ilalaliya guud ayaa codsadey in uu qaato Appeaal, hase yeeshee kolba dib ayaa loo dhigi jirey kol haddaan la heyn sharci la mariyo ama lagu soo oogo. Garsoorihii waxaa lagu amrey inuu dalka kaga baxo muddo ku sugan 12 saacadood, xeer ilaaliyihii Talyaanigu dalka wuu sii joogey kana sii shaqeeyey. Iyaba waa yaabe muxuu galabsadey garsooruhu oon aheyn inuu run ka sheegay inaaney jirin laba dal oo sharci ahaan iskugu darsamey! Bal adba akhriste!

***SOMALILAND OO JIRTOO, CIDI SALUUGAYNIN***

***OO SAMAYSAY DIMUQRAADINIMO, DOORASHADA SUUBBAN***

***OO DUNIDA SACAB LOOGA TUMAY, SOCOD WANAAGEEDA***

***OO NABADDU SAAMAYSAYOO, HORUMAR SOO GAADHAY:***

***SINNAAN IYO WANAAG GUURTIDAA, SAMA AWAALAYSA***

***SADDEXDAA XISBEE LAGU TARTAMAY, WAA HANAAN SARE***

***AFRIKABA SIDAA LAGUMA ARAG, SEBENNO DHAADHEER E***

***MAANTANA SAGAAL CIIDAN BAA, SOOHDIMA TUBAN E***

***QARANIMADA SOMALILAND, SAATIR BAA QORAY E***

***ILAAHI INAGA SAARAY XAMAR, MAHADDA AAN SIINNO.***

***Curintii Cabdi-Weli A. Cilmi (IHUN)***

Farshaxan Research Institute

1. *Wareysi Marwo Qamar Cabdiqaadir*
2. *Wareysi Ambassador Maxamed Cismaan Cumar IBraahimoo*
3. *Wareysi Dr. Cabdiqaadir Cali Boolaay*
4. *Wareysi Amabassador Cabdilaahi Koongo*
5. *Wareysi Axmed Yuusuf Ducaale*
6. *Somalia: The untold history of 1941-1969 – Maxamed Trunji*
7. *Politics of Cain – Dr. Xuseen Bulxan*
8. *All in the Family - Maxamed Sh. Ibraahin Xujaale*

***Xusuusin:***

***Illaahay dhamaan ha u wada naxariisto dhamaan dadka aanu xusnay magacoogii ee ku jira qoraalkan.***

**Tifatirkii iyo Ururintii**
**Fu'aad Sh. Abuubaker**
**(Fu'aad Sh. Jabha)**
**Bahda Mareegaha Farshaxan**
**www.farshaxan.com and www.farshaxan.org**